QORSHAHA XAGAAGA EE COVID-19: GUUDMAR

Kani waa guudmarka **Qorshaga Dowladda ee Xagaaga ee COVID-19**

Daabacaada dhammayka tiran - oo dejinaya barnaamijkeenna xakamaynta fayraska, ilaalinta NHS iyo kuwa nugul, sii wadidda waxbarashada iyo dhaqaalaha iyo helida waddo dib loogu noqonayo sidii caadiga aheyd - ayaa laga heli karaa halkan:

ULAJEEDOOYINKA DOWLADDA

1. Istrataatiijiyadda Dowladda waxaa hagi doonaa saddex ulajeedo:
    a. Xakameynta faafidda caabuqa.
    b. Helitaanka habab cusub oo wax ku ool ah oo lagu maareeyo fayraska iyo awood u siinta nolosha in ay ku soo noqoto mid caadi ah.
    c. Yaraynta dhaawaca soo gaaraya dhaqaalaha iyo bulshada, shaqooyinka iyo nolosha. Iyo hubinta ilaalinta waxbarashada ee xannaanooyinka, dugsiyada, kuliyadaha iyo jaamacadaha.

DIB UGU NOQOSHADA NOLOSHA CAADIGA AH

2. Bilaha soo socda, Dowladdu waxay awood u yeelan doontaa in ay si ka yar ugu tiirsanaato xaddidaadaha dhaqaale iyo bulshada iyo in si ka badan ugu tiirsanaato xalalka ay bixiyaan horumarka cilmiga.

3. **Tallaalku wuxuu udub dhexaad u yahay qorshaha Dowladda si loo hubiyo in noloshu ay ugu laaban karto sidii caadiga ahayd intii suurtagal ah.** Dawladdu waxay ku dhawaaqday heshiisyo ay la gashay toddobo soo saarayaal tallaal oo kala duwan, iyada oo sugaysa helitaanka in ka badan 350 milyan oo tallaal qaadasho ah oo laga heli karo guud ahaan UK. Bisha soo socota, Dowladdu waxay diyaar u ahaan doontaa barnaamij tallaal oo UK oo dhan in uu bilaabmo, haddii ay sharciyeeyaashu ansixiyaan tallaalada.

4. Badbaadada dadweynaha marwalba iyada ayaa mudnaanta koowaad leh Tallaalka COVID-19 waxaa loo ansixin doonaa oo keliya in la isticmaalo haddii uu gaadhsiisan yahay heerar adag oo ku saabsan badbaadada, waxtarka iyo tayada iyada oo loo marayo tijaabooyinka caafimaad.

5. **Daaweynta wax ku oolka ah ee COVID-19 ayaa sii ahaan doonta mid muhiim u ah maareynta fayraska xitaa xilliga lagu jiro fidinta tallaalka ee UK iyo adduunka oo dhan,** oo ay ku jiraan kuwa aan la tallaali karin, tusaale ahaan maadaama ay yihiin kuwa difaacooda aan si wanaagsan u shaqeyneyn. Helitaanka daaweyn wax ku ool ah waxay yareyn doontaa halista nolosha iyo jirrooyinka halista ah ee dadka qaada fayraska waxayna taageeraan ku noqoshada nolosha caadiga ah.

6. Barnaamij xoojin ah oo **lagu baaro bulshada** ayaa noo ogolaanaya in aan ogaano oo aan go'doominno dadka aan lahayn astaamo laakiin si aan ula kac aheyn u sii fidinaya fayraska. Intaas waxaa sii dheer, Dowladdu waxay sidoo kale daahfuri doontaa, baaris deg-deg ah oo joogto ah heer qaran ah oo ku wajahan shaqaalaha

safka hore ee NHS-ta, daryeelka bulshada iyo goobaha kale ee halista sare leh ama muhiimka ah.

7. Awoodda baaritaanka kuwa qaba calaamadaha COVID-19 ayaa kordhay ku dhowaad shan laab lix bilood gudaheed, laga bilaabo 100,000 maalintii dhammaadkii Abriil ilaa 500,000 maalintiiba dhammaadka Oktoobar, iyadoo ay jiraan qorshayaal weli kor loogu sii qaadayo marka la gaaro dhammaadka sanadka. **Tan waxaa heli kara muwaadiniinta ku nool qayb kasta oo ka tirsan UK.** Dawladdu waxay ka shaqeyneysaa sidii loo hagaajin lahaa waqtiyada lagu soo dhameystiro baaritaanadan si kasta oo ay baaxadooda u korodho una adkaato arimaha saadka ee shabakadda la ballaariyey

XAKAMEYNTA FAYRASKA

8. Horumarka cilmiyaysan ee kor lagu sharaxay waxay siinayaan wadada dib ugu noqoshada nolosha caadiga ah waana in ay yareeyaan baahida loo qabo xannibaadaha dhaqaale iyo bulsho ee xilliga guga. Laakiin ilaa inta laga sameynayo, Dowladdu waa in ay sii wadaa adeegsiga aaladaha kale ee hoos loogu dhigayo fayraska.

WAJIHID YOOL LEH OO ENGLAND GUDAHEEDA AH

9. Qorshaha Jiilaalka ee COVID-19 ayaa sidoo kale qeexaya sida aan **u qaadi doonno xayiraadaha qaran ee England 2da Diseembar**. Tani waxa ay ku suurowday oo keliya dadaalka qof walba intii lagu jiray xayiraadaha hadda ka jira England waxayna yareeysay faafitaanka fayraska khafiifisayna cadaadiska saaran NHS-ta.

10. **2-da Diseembar, guud ahaan England, iyadoo aan loo eegin darajada:**

    a. Amarka Joogitaanka guriga ayaa dhammaanaya, iyada oo safarka mar kale la fasaxayo iyadoo la raacayo hagitaan darajo kasta ah.

    b. Dukaamada, daryeelka shakhsiga ah, goobaha jimicsiyada iyo guud ahaan qeybaha damaashaadka ayaa dib loo furi doonaa.

    c. Cibaadada wadajirka ah, aroosyada iyo cayaaraha bannaanka ayaa dib loo bilaabi karaa.

    d. Dadku mar dambe kuma koobnaan doonaan in ay arkaan hal qof oo kale oo keliya meelaha dibadda ah - xeerka 6 ayaa hadda lagu dabaqi doonaa dibadda sidii horey loogu dabaqey darajooyinkii hore.

11. **Si kastaba ha ahaatee, fayrasku wali wuu jiraa oo haddii aynaan taxaddarin wuxuu si dhakhso leh uga bixi karaa faraha mar kale ka hor inta ay tallaallada iyo baaritaanka bulshada saameyn yeelan karaan.** Taasi waxay khatar galinaysaa horumarka uu dalku ku talaabsaday mar labaadna wuxay halis ku keeni kartaa culeys aan loo dulqaadan karin oo fuula NHS-ta wuxuuna qalliinada muhiimka ah.ka soo saarayaa bukaanada aan ahayn kuwa qaba 'Covid'

12. **Tani waa sababta, 2-da Diseembar, England ay dib ugu laaban doonto qaab heer goboleed, wajihid derajaysan -** maxaa yeelay waa sax in lala beegsado

tallaabooyinka ugu adag meelaha aan ku arkeyno heerarka ugu sareeya ee caabuqa.

13. **Tallaabooyin ugu adag ayaa lagu soo bandhigi doonaa darajo kasta si fayraska loo xakameeyo:**

    a. Darajada 1, Dawladdu waxay xoojin doontaa muhiimadda ay leedahay in lagu shaqeeyo guriga mar lkasta oo suurtagal ah.
    b. Darajada 2, baararka waa in ay xirnaadaan, ilaa ay yihiin kuwo ku dhex shaqeeya makhaayadaha mooyee, iyo goobaha martigelinta waxaa kaliya oo ay khamri bixin karaan marka ay la socotto cuunno mug leh.
    c. Darajada 3, martigelinta oo dhan way xirmi doontaa marka laga reebo keenista, qaadista iyo gaari ku sii qaadashada; hoteelada iyo bixiyeyaasha kale ee hoyga waa in ay xirmaan (marka laga reebo ka-dhaafitaanno gaar ah, oo ay ku jiraan dadka u jooga ujeedooyin shaqo ama meel aysan guryahooda ku laaban karin); goobaha madaddaalada gudaha iyo goobaha dalxiiskuna waa in ay sidoo kale xirmaan.

14. **Dawladdu sidoo kale waxay dib u habeyn doontaa darajooyinkii hore:**

    a. 10ka fiidnimo ee xiritaanka martigelinta waxaa loo bedelay in dalabka ugu danbeeya la sameyn karo 10ka fiidnimo waqtiga la xirayana tahay 11ka fiidnimo. Arintani waxaa ay sahleysaa in macaamiisha ay si tartiibtartiib ah u baxaan, waxayna u ogolaaneysaa in ay u shaqeeyaan dabacsanaan ka weyn.

    b. Darajooyinka 1 ama 2, isboortiga la daawado iyo xafladaha ganacsiga ayaa hadda dib uga bilaaban kara gudaha iyo dibaddaba iyadoo ay jiraan xaddidaadyo baaxadeed iyo kala fogaanshaha bulshada, si loo siiyo is-waafajin dheeri ah oo ku saabsan bandhigyada gudaha ee tiyaatarada iyo hoolalka xafladaha.

    c. Dawladdu waxay ballaarinaysaa u-qalmitaanka 'goobooyinka taageero'. Tani waxay gacan ka geysan doontaa yareynta saameynta xannibaadaha saaran waalidiinta carruurta da'doodu ka yar tahay 1 (ama ka yar 5 iyo naafanimo oo muhiim ka dhigeysa daryeel joogta ah) iyo qoysaska qof weyn oo keli ahi daryeelo qof qaba naafanimo daran.

15. Darajooyinkan **waxaa loogu talagalay in lagu xakameeyo faafitaanka caabuqa.** sidaa darteedna la taageero aagagga si hoos loogu dhigo darajooyinka. Dawladdu waxay go'aamin doontaa darajada aag kasta uu galayo marka la gaaro 2da Diseembar iyo sida aagaggu ugu kala bedelmayaan darajooyinka intaas ka dib. Tani waxay ku saleysnaan doontaa tilmaamayaal cad oo heerka fayraska ah, qadarka kororka iyo awoodda NHS-ta.

16. In kasta oo ay ka yar tahay xaddidaadaha qaran ee hadda socda, **Dawladdu waxay aqoonsan tahay sida ay tallaabooyinkani ugu adag yihiin dadka iyo ganacsiyada ka tirsanaan doona darajada 3,** gaar ahaan qaybaha dalka ee ku jirey nooc ka mid ah xannibaadaha tan iyo xagaagii. Tani waa sababta ay Dawladdu

ugu fidin doonto Maamulada Degmooyinka fursad ay kaga wada shaqeeyaan baaritaan guud ee bulshada iyo baaritaano ka sii badan oo lala bartilmaameedsanayo goobaha halista sare ku jira, iyadoo ay weheliso kor u qaadista nidaamka baaritaanadda asaasiga ah. Marka ay weheliso is-go'doominta kuwa laga heley cudurka, ballaarintan mugga leh ee baaritaanka waa aalad cusub oo muhiim ah oo ka caawinaysa aagagga in laga baxo tallaabooyinka ugu adag.

17. Saameynta dhaqaalaha iyo hab nololeedka shaqsiyaadka ayaa aheyd mid aad u daran, si kasta oo ay dowladda wax uga qabatey. Tani waa sababta ay Dowladdu si dhaqso leh ugu talaabsatay si ay u taageerto dhaqaalaha una ilaaliso shaqooyinka dhammaan afarta dal ee UK ayadoo adeegsatey Mashruuca Shaqa Ilaalinta ee Coronavirus, Mashruuca Taageerada Dakhliga Iskood-u-Shaqeystayaasha iyo sidoo kale dhowr mashruuc oo taageero ganacsi ah.

CHRISTMAS-KA IYO KA DIB

18. Dawladdu waxay aqoonsan tahay in Christmas-ku yahay waqti sannadka muhiim u ah dad badan, oo dhammaanba UK ku sugan. **Iyadoo aan loo eegin iimaanka, xilliga Christmas-ku waa waqti inta badan lala qaato qoysaska iyo asxaabta, iyadoo dugsiyada iyo xafiisyada la xirayo dadkuna ay safrayaan xilliga fasaxyada.**

19. Christmas-ka wuu ka duwanaan doonaa sannadkan, laakiin waxaan hubin doonaa in ay dadku arki karaan gacalkooda. **Waxaan ku heshiineynaa qaab wajihid isku mid ah oon kula heshiineyno Maamulada** Scotland, Northern Ireland iyo Wales isbadal waqti xaddidan ah oo xayiraadaha bulshada xilliga Chritsmas-ka si qoysaska ay isugu yimaadaan UK oo dhan.

20. **Xaqiiqda ah in ay ahayd sannad ku adag qof walba waxay ka dhigan tahay in waqti lala yeesho gacalka ay ka sii muhiimsanan doonto.** Sababtaas awgeed Dowladdu waxay oggolaan doontaa xoogaa xiriir bulsheed ah oo qof walba u kordha (oo ay taageerto hagidda sida loogu dabaaldego si badbaado ah) xilliga Christmas-ka. Qof kastaa waa in uu hubiyaa in uu raaco tilmaamaha si loo yareeyo halista si ay u ilaaliyaan kuwa gacalkooda, gaar ahaan kuwa ugu nugul.

21. **Dawladdu waxay sidoo kale aqoonsan tahay tanaasulka/huritaanka weyn ee ay sameeyeen dadka diimaha oo dhan sannadkan;** xayiraadda ayaa jirtey iyadoo la soo marey dhowr ciidood iyo cibaadooyin diini ah, waana sababta tanaasulladan/huritaannadan ta keentay in ay suurtagashay in la xakameeyo fayraska. Cibaadada wadajirka ah ayaa hadda u suurta gali doonta dhammaan diimaha dhammaan sedexda darajo hogaamiyaasha diintuna waxay sii wadi doonaan in ay door muhiim ah ka ciyaaraan, iyagoo ka tashanaya sida cibaadada diineed looga dhigi karo sida ugu macquulsan oo badbaado ah.

22. **Arintanu ma ahaan doonto mid halista ka maran:** Waxaa sii socon doonta COVID-19 in uu khatar aad u dhab ah ku hayo dadka reer UK ilaa iyo dhammaadka sannadka 2021-ka. Tan macnaheedu waa in aysan suurtagal aheyn in Christmas-ka loogu dabaal degi karo "sidii caadiga aheyd". La kulanka qoysaska kale waxay kordhin doontaa halista ah qaadista COVID-19 iyo in loo gudbiyo dadka kale. Mid

kasta oo inaga mid ah wuxuu u baahan yahay in uu qaado masuuliyad shaqsiyadeed inta lagu gudajiro xilliga Christmas-ka si loo xaddido faafidda fayraska, loo ilaaliyo gacalkeena oo taxadar gaar ah loo yeesho kuwa nugul. Waa muhiim in aan dhammaanteen is baarno markay habboon tahay, is-go'doominno si aan u ilaalino kuwa kale, xusuusnaano qiimaha hawada nadiifta ah, isla markaana is ilaalinno midba midka kale annagoo adeegsaneyna Gacmaha, Wejiga, kala fogaanshaha

KU TAAGNAANTA HAB-DHAQAMADA SAXDA AH

23. Waddada ugu muhiimsan ee lagu xakameynayo fayraska waa in aan dhammaanteen raacno hab-dhaqamadda saxda ah.

24. Tan waxaa ka mid ah in gacmaha loo dhaqo si joogta ah ugu yaraan 20 ilbidhiqsi, xirashada weji daboolida iyo hubinta in hawo badan oo nadiif ahi ay jirto meelaha xidhan, ilaalinta kala fogaanshaha bulshada iyo is-go'doominta marka cudurka laga shakiyo ama la xaqiijiyo.

25. Dadweynaha UK waxay shaki la’aan ka caawimo ka geysteen yareynta faafitaanka fayraska iyaga oo qaatay hab-dhaqamadan xitaa marka laga yaabo in ay sababeen dhibaato bulsho iyo dhaqaale.

26. Hab-dhaqamadani waxay sii ahaan doonaan kuwo muhiim u ah jiilaalka waana in aan dhammaanteen sii wadnaa inaan doorkeena ka ciyaarno.